



Discover a World of Opportunity™

Tilmaamaha Waalidka ee Qiimaynada

W-APT (IMTAXAANKA MEELAYNTA EE WIDA-ACCESS)

Qiimeynta waxay siisa warbixin qiimo leh ardayda, waaladiinta iyo macalimiinta oo kusaabsan in ardaydu ay gaareen heerka fasalka laga rabo iyo heerarka udagsan maadada ayna kusocdaan wadadii qalin jabinta oo udiyaarsan qarniga 21 aad. Natijjooyinkaan qiimaynta waxaa loogu talagalay inay hal cadayn unoqdaan hormarka aqooneed ee cunugaaga.



MAXAY TAHAY QIIMAYNTAAN?

Imtixaanka Meelaynta ee WIDA-ACCESS waa "imtaxaan" lagu hubinaayo aqoonta luuqada Ingiriiska kaasoo laga qaado ardayda kcusub degmada ee fasalada K-1 kuwaasoo laga yaabo in lagu daro ardayda Barata Af-Ingiriisiga (ELSS). Waxay kacaawisaa macalimiinta aqoonsiga ardayda kamid noqonaaya ELs iyo inay booska kuhaboon kagaliyaan barnaamijyada dugsiga. mtaxaanka W-APT wuxuu cabiraa luuqada bulshanimo iyo aqooneed ee afarta qaybood ee luuqada oo kala ah Dhagaysiga, Akhriska, Qorista iyo Kuhadalka. Luuqada bulshanimada waxaa loo adeegsadaa in layskula xariiro arimaha maalin kasta halka luuqada aqoonta loo adeegsado wax laysku fahan siiyo gudaha fasalka.



XAGEE AYAA CUNUGAYGA IMTAXAANKA LOOGA QAADAYAA?

Imtaxaanka W-APT waxaa hal mar laga qaadaa ardayda barata Ingiriisiga ee kujira fasalada K-1 marka koobaad ee ay degmada soogalaan. Waxaa laqaadaa 10 maalmood gudahood laga bilabo marka ardayga ladiiwaangasho waxaana laaadi karaa xili kasta oo kamid ah sanad dugsiyeedka.



WAA MAXAY BUUNDOOYINKA CUNUGAYGU HELI DOONO?

Ardyada galaaya imtaxaanka dugsiga caruurga kuwaasoo ay kujiri karaan ardayda dhigta fasalada 1aad ee kujira fatradii koobaad ee sanad dugsiyeedka ayaa heli doona macluumaad aadloodaraaseeyay si looga caawiyo in macalinku ogaado awoodaha luuqada Ingiriiska ee ardayga. Buundo guud ayaa lasoo saaraa kadibna waxaa loo adeegsadaa qaadinta xirfadaha uu ardaygu awoodo inuu dhamaystiro. Qaybaha imtaxanaka ee kuhadalka iyo dhagaysiga, buundo iskudhafan ayaa lasoo gudbiyya taasoo udhaxaysa cabirada Hoos, Dhexdhexaad, Sare, ama Mid Gaar ah.

Ardyada kujira fasalada 1-12 ayaa laga qaadayaa imtaxaanka ayadoo la adeegsanaayo imtaxaanka WIDA.



SIDEE AYAA BUUNDOOYINKAAN LOO ADEEGSANAYAA?

Natijjooyinka ayaa noqonaaya aasaaska awoodaha luuqada Ingiriiska ee ilmaha markuu soo galaayo dugsiga degmada. Tano waxay gacan kagaysanaysaa hanaanka aqoonsiga ardayda baranaaya Ingiriisiga. Koox kakala socota macalimiinta iyo maamulka ayaa u adeegsanaaya buundada ardayga inay go'aanshaan in ardaygu ubaahan yahay taageero dheeri ah oo laga siiyo Luuqada Ingiriiska. Ardayda keena buundo sare oo kufilan waxaa loo aqoonsan karaa inay yihiiin kuwo aqoon uleh luuqada markay degmada soo galayaan.



WARBIXIN DHEERAAD AH

Waxaan kugu dhiirigalinaynaa inaad kaqaybgasho waxbarashada cunugaaga. Fadlan haka daahin inaad laxariirto macalinka ardaygaaga si uu kuugu sheego qaababka aad kucaawin karto cunugaaga markuu guriga joogo iyo helitaanka caawimaado dhanka imtaxaanka ah.

Wixii macluumaad dheeri ah: WIDA

- www wida us/assessment

Wixii macluumaad dheeri ah: Qiimeynada

Booqo:

- <http://assessments dpsk12 org>

Hadaad su'aalo iyo walaacyo kaqabto imtaxaanada, fadlan laxariir dugsiga cunugaaga si toos ah ama wac Adeegyada Deegnaaka Qoyska oo nambarkoodu yahay (720) 423-3054.